**Xeerka 29 Agoosto 1957, lamba. 31 rep.**

**Meelmarinta Xeerka Qaybta Madaxa Bannaan ee Amaahda dhismahuu ku taalla "Amaahda Soomaaliyeed"**

**MAAMULAHA**

Marka uu arkay Xeerka 7 Maajo 1956, lamba. 1 "dhismaha \xukuumadda Soomaaliya";
Marka uu arkay Dekereetada 18 Maajo 1956.78 "Xeerka Xukumadda Soomaaliya";
Marka uu arkay Xeerka 30 Setember 1956 lamba. 5 "Ballaarinta Hawgallada Amaahda Soomaaliya";
Marka uu arkay Dekereetada 29 Agoosto 1957, lamba. 28 ee lagu dhisay Qaybta Madaxa Bannaan ee Amaahda Dhismahaoo oo ku taalla "Amaahda Soomaaliyeed;
Marka uu garowsaday baahida loo qabo in la meelmariyo Xeerka Qaybta Madaxa Bannaan oo ay leedahay Amaahda Dhismaha;
Talana uu soo jeediyay Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha.
La dhagaystay Golaha Wasiirada;

**WUXUU DEKERETO KU SOO SAARAYAA:**

**QODOOBKA QURA**

Waxa la meelmariyay xeerka midaysan ee Qaybta madax bannaan ee Amaahda Dhismaha oo ku taalla "Amaahda Soomaaliyeed" sida ku qoran buugga midaysan ee uu saxiixay Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha.

Muqdisho, 29 Agoosto 1957.

P. Maamulaha
**P. Franco**

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

**Xaaji Faarax Cali Cumar**

La Hubiyay lana diiwaagaliyay – Diw. lamba. 4 – bogga lamba. 168

Muqdisho, 29 Agoosto 1957.

Hantidhoraha Guud: **Spadaro**

Xeerka Qaybta Madaxa Bannaan ee Amaahda Dhismaha oo laga dhisay dhisan Amaahda Xaqa Guud " Amaahda Soomaaliyeed"

---

**Xeerka Qaybta Madaxa Bannaan ee Amaahda Dhismaha ee laga dhisay Amaahda Xaqa Guud ee Amaahda Soomaaliya.**

**Qod. 1**

Qaybta Madaxa Bannan ee Amahda dhismaha, e lagu dhisay Dekereetada lamba. 28 Agoosto 1957 oo laga abuuray Amaahda Xaqa Guud ee "Amaahda Soomaaliyeed", waxay leedahay shaqsiyadeeda qaanuunuuneed, hanti u gaara iyo maareyn u gooniya waxaana lagu dhaqayaa shuruucda Dekereetda lagu dhisay iyo Xeerkaan.

**Qod. 2**

Muddada jiritaanka Qaybta.

**Qod. 3**

Hadafka Qaybta waa in ay ku horumariso amaahda dhismaha lagu bixinayo, dhismaha guryaha rayidka ee la dego.

**Qod. 4**

Qaybta waxay ku qabanaysaa hawlaqabadyada amahdeeda:

a) — hantideeda;
b) — qiima dhimista bortofolyadeeda.

**Qod. 5**

Amaahyada waxay noqon karaan kuwa leh ugu badnaan muddo labaantan iyo shan sano waxaana lagu bixinayaa hawlgal kasta ee maaliyadeed ee la xariira dhismaha, dhalan-rogga, ballaarinta iyo kor-saaridda ee guryaha rayidka ee la dego cabbir u dhigma qiimaha khabiirka dhismaha, dhalan-rogga, ballaarinta iyo kor-saaridda, oo ay sameeyaan farsamayaqaanno Qaybtu ay ku kalsoontahay. Lacagta lagu bixinayo amaah kasta kama badnaan karto 75% qiimaha khabiirka ku soo qiimeeyay. Amaahyada waxaa kaalin doona diiwaangalinta rahanta darajada kowaad ee hawlaha iyo rakibaadda haddii aanay saarnayn dammaanad waajibaadyo kale waxaana loo bixinyaa si tartiib-tartiiba iyadoo lagu saleynayo kolba sida hawlaha horay loo wado kadib markii ay hubiyaan farsamayaqaanno Qaybtu ku kalsoontahay.

Baabi'inta amaahda la baxshay waxay ku imaanaysaa qaab ku salayn qorshe dayn-bixin oo qayb ka ah heshiiska amaahda oo aay waajib tahay inuu ku jiro qaabab kale ee fulin oo ku saabasn isla amaahda.

Ka sokow dammaanadda rahanta caadiga, waxaa lagu bixinayaa si waafaaqsan Dekereetada Qaybta lagu dhisay, dammaanadda raasamaalka la amaahday iyo dulsaarka ku waajibay marka la eego heshiiska amaahada lala galay Qaybta, mudnaanta sharciyeysan oo ku waajahan dhismaha waxa la amaahday, darajada labaad ka dib midka u sugnaaday maamulka dawladda marka la eego shuruucda jirta.

Abuuridda mudnaantasu waxay ku imaanaysaa awood sharci "(ope legis) marka la eego Dekereetada kor ku xusan, iyadoo aan loo baahnayn qaabaab gaara, oo aan ahayn kuwa diiwaangelinta heshiiska amaahda oo qaybtu ay u xilsaarantahay.

**Qod. 6**

Hantida Qaybtu waxay ka koobantahay:

a) lacago deeq aha Sh. So. 500.000;
b) wixii tabarucaad kale oo ay bixiso Xukumadda Soomaaliya;

c) tabarucaadka lacago lumay, hibooyinka, xanniban iyo wax kasta ka madax bannaan;
d) siismooyin iyo ka qaybgal wakaalado kale oo daneeya horumarka dhismaha qaybaha la soo sheegay;
e) lacagaha keydka.

40% lacagaha kor lagu sheegay ee deeqda ugu horreysa waxay gaar u tahay hawlgalada ku saabsan shaqaalaha dawladda, iyadoo lagu saleynayo xeerkooda nidaaminaya bixinta amaahda dhismaha oo la siinayo shaqaalaha dawladda.

Xaaladaha ku saabsan siyaadinta raasamaalka deeqahaaa, waxaa lagu go'aaminyaa qaraar lagu darayo qoondaha loo keydinayo shaqaalaha. Siismooyinka iyo ka qaybgalka wakaalado waa in lagu oggolaadaa qaraar ka soo baxa Wasiirka Arrimaha Dhaqaalahaa ka dib markii Guddiga ilbaadinta ay ku soo taliyaan, lana dhagaysto Golaha Wasiirada iyadoo aan ka badanaan karin 49 % hantid idil ee Qaybta.

**Qod. 7**

Qaybtu waxay la wadaagtaa Amaahda Soomaaliyeed xubnaha soo socda:

a) — Golaha Maamulka oo lagu kordhiyo sarkaal ka socda Wasaaradda Arrimaha Guud marka la meelmarinayo amaahda ay weydiisteen shaqaalaha dawladda oo ku saleysan axkaamta gaarka ee nidaaminaya arrimaha amaahda dhismaha ee la siinayo shaqaalaha dawladda;
b) — Guddiga Fulinta;
c) — Guddiga Baarista;
d) — Agaasimaha;

awoodda la siiyay ayaa lagu nidaaminayaa xeerka lagu dhisay Amaahda Soomaaliyeed iyo Xeerka la xariira.

Sida lagu caddeeyay Dekereetda lagu dhisay Qaybta iyo Xeerkaan, ayaa lagu dhaqayaa xubnahaan axkaamta ku jirta Xeerka 30 Setember 1956 lr. 10 iyo Dekereetada 30 Setember 1956 lamba. 95 rep.

**Qod. 8**

Guddoomiyaha iyo Agaasimaha Amaahda Soomaalida ayaa noqonaya Guddoomiyaha iyo Agasimaha Qaybta.

Mataaladda sharciga ee Qaybta waxay u sugnaatay Guddoomiyaha.

**Qod. 9**

Qaybtu si hawlaheeda u fuliso, waxaa sii jiraya adeegyadii Amaahda Soomaalida waxayna u dhigmaysa isla Xeerka, iyado ku bixinaysa waxqabadyadeeda, qoonda sanadeed la qiyaaso oo ay meelmariyaan Golaha Maamulka.

**Qod. 10**

Awoodda lagu saxiixo magaca Qaybta waxay u sugnaatay:

— gooni ahaan Guddoomiyaha dhammaan arrimaha iyo qoraalada ku saabsan mowduucyada iyo ballan qaadyada muhiimka oo ay go'aamiyaan Golaha Maamulka;

- — Guddoomiyaha oo uu wehliyo Agaasimaha arrimaha iyo qorolaada waxaa ka ratimaya ballan-qaadyo Qaybtu ay u qaaddo cid saddexad iyo bixinta rasiid lacageed wixii ka badan Sh. So. 30.000;
- — Agaasimaha waxaa u gaara bixinta rasiidka lacag gaaraysa Sh. So. 30.000 , —, iyo wixii u dhigma ee caadiga.

**Qod. 11**

Hawlgallada sanadlaha ee Qaybta waxay bilaabanaysa 1 Jannaayo waxayna ku dhammaanaysaa 31 Disember.

Hawlgalka ugu horreya wuxuu bilaabanaya taariikh ka hooseeya 1 Setember 1967 waxayna xirmaysaa 31 Disember.

Miisaaniyadda Qaybta waxaa oggolaanaya Golaha Maamulka, waxaana lagu lifaaqayaa Miisaaniyadda Amaahda Soomaalida.

Faaiidada saafiga ee sanadlaha sidan ayaa loo qaybinayaa:

a) — tobankii meelood saddex Lire lacagta keydka;

b) — wixii soo hora waxaa loo qaybinayaa wixii ka qaybgal ah ugu badanaan 5%;

c) — wixii ka saaida lacagta keydka aan caadiga ahayn.

Lacagaha keydka waxaa lagu maalgalinayaa mowduucyo guud ama amaahda rahanta darajada labaad.

Tirada qaabkan ugu dambeeya ee maalgalinta kama badnaan karto kala bar lacagaha keydka.

**Qod. 12**

Qaybta waxaa ilbaadin ku leh Guddiga Ilbaadinta oo ku dhex yaalla Wasaaradda Arrimaha Maaliyadda ee lagu dhisay Xeerka lamba. 10 ee 39 Setember 1956.

Guddiga la soo sheegay wuxuu u xilsaaranyahay ilbaadinta hawlgallada Qaybta ku aaddan dhowrista iyo dabbaqidda xeerarka nidaaminta iyo maamulidda.

Iyadu waxay leedahay awood ballaaraan oo ay wax ku ilbaadiso waxna ku baarto hawlgalada faaiidada iyo khasaaraha Qaybta.

**Qod. 13**

Qaybtu waa in ay u dirtaa Guddiga Ilbaadinta — Wasaaradda Arrimahaha Dhaqaalaha nuqullo ka mida dokumentiyada soo socda:

a) — saddexdii biloodba, inta lagu jiro bisha ku xigta xaaladaha xisabaadka dhammaadka saddex biloodlaha;

b) — saddexdii biloodba, inta lagu jiro bisha ku xigta, liistada amaahyada jira iyo la baxshay iyadoo la tilmamayo hantida dammanad ahaan loo hayo;

c) — affar bilood marka laga joogo xiridda hawlqabadka warbixinda Golaha Maamulka iyo Guddiga Baarista iyo xiritaanka miisaaniyadda sanadlaha oo ay wehliyaan lifaaqyadoda. Warbixinta Golaha Maamulka waa in ay ka dhex muuqataa, barnaamijkka waxqabadka Qaybta.

d) — ugu yaraan saddex cisho ka hor marka kulanka la muddeeyay, ogaysiiska shirka Golaha Maamulka iyo Guddiga fulinta oo wata hawl-maalmeedkooda;

e) — lix cisho gudahod maalmaha la shaqeeyo marka laga joogo marka kulanku dhaco nuqul ka mida maxdarka/dood-qoraaleedka la xariira.

Baaqa ugu ugu horreeya ee ku xusan baaragarafyada a) iyo b) ee qodobkaan waa in lagu sameeya dhicitaanka ka hor 31 Disember 1957.

**Qod. 14**

Guddiga Ilbaadinta wuxuu ku samayn karaa Qaybta ilbaadin xilliyeed iyo mid aan caadi ahayn iyadoo laga doonayo in ay siiyaan qolada u xilsaaran ilbaadinta macluumaad kasta iyo in ay tusiyaan diiwaanada, qoraallada iyo dukumintiyada ay weydiistaan.

**Qod. 15**

Tala soo jeedinta Guddiga Ilbaadinta oo ay la socota talada Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, lana dhagaystay Golaha Wasiirada , Maamuluhu wuxu baabin karaa isla markaasna u diri kara xaq-gudid Qaybta, taaso loo xilsaariyo Sarkaal sameeya xaq-gudidda oo uu isagu magacaabo markii ay dhacaan xaaladaha soo socda:

a) markii la xaqiijiyo gefaf iyo xadgudubyo culus ee xeerka, xeer nidaamiyaha iyo axkaamta kale oo lagu nidaaminayo Qaybta;

b) marka la xaqiijiyo khasaare isku fuuqsaday, ka sokow lacagtii keydka lagu dhisay, oo ay sii raacdo wax ka badan kala barka hantidii Qaybta;

c) Marka la xaqiijiyo u qalmid la'aanta Qaybta in ay gaarto hadafkeedi dhabta.

Marka lakala diro Qaybta, Maamulaha Soomaaliya, uuna tala ku soo jeediyo Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, lana dhagaysto Golaha Wasiirada, wuxu dekereeto ku amarayaa in loo weeciyo hantida saafiga ee Qaybta ulajeeddo dan guud.